

## Xuddunta Xuquuqaha Shaqooyinka

Iyada oo qayb ka ah ballan-qaadyada Duqa Magaalada London ee ah inuu ka dhigo magaalo ka caddaalad badan oo laga dhex shaqeeyo, waxaan bixinaynaa macluumaad ku saabsan xuquuqaha shaqooyinka kala duwan iyo tafaasiisha waxa la sameeyo haddii aad dhib shaqada kaala soo gudboonaato.

### Farriin ku saabsan turjumidda

Hagahan waxaa laguugu tarjumay luqaddaada iyadoo Ingiriisiga laga soo turjumey. Qaar ka mid ah macluumaadka aan ku xirnay waxaa lagu heli karaa oo keliya Ingiriisiga. Haddii aad jeceshahay inaad akhriso, Google Translate waxay kuu fidinaysaa adeeg, kaas oo aad uga turjunto bog internet oo dhan. Furo baadhaha internet-ka kuna qoro [translate.google.com](http://translate.google.com). Sanduuqa qoraalka ee dhinaca bidix, ku qor URL oo dhan (oo ay ku jiraan [http: //](http://)) bogga aad rabto inaad daalacato. Dhinaca midig, dooro luqadda aad rabto inaad ku aragto bogga internet-ka. Bogga internet-ka tarjuman ayaa soo muuqan doona, oo waxaad ku dhex baari kartaa bogga oo dhan luqaddaas adoo gujinaya xiriiriyeyaasha bogga - illaa intaad ku jirtid barnaamijka xog la wadaaga Turjumaha Google.

Fadlan la soco in adeegga Tarjumaha Google uusan 100% sax ahayn, oo aan loogu tiirsanaan karin tarjumaadda saxda ah ee macluumaadka sharciga. Haddii aad qabto dhibaato qalafsan oo aan looga jawaabin dukumiintigaan, waxaa ugu fiican inaad

# MAYOR OF LONDON

---

booqato xarun talo-bixin fool-ka-fool ah ama aad soo wacdo khadka caawinta Acas 0300 123 1100 kaasoo furan laga bilaabo 8-da subaxnimo ilaa 6-da fiidnimo, Isniinta ilaa Jimcaha adeegaas oo awooda in uu kugu caawiyo luqad kasta. Khariidad isla-falgal iyo liis xarumaha talo bixinta ah, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan in xarumuhu bixiyaan adeegyo turjubaan iyo in kale, ayaa laga heli karaa xaga hoose. Haddii xaruntaada xaafaddu aysan bixin adeegyo turjubaan, badankood way ku farxi doonaan inaad u soo kaxaysatid saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah oo kuu turjuma.

## Waa maxay xuquuqaha shaqadu?

Boqortooyada Midowday (UK) waxa jira sharciyo ay dejisay dawladda oo kugu difaacaya goobtaada shaqada. Kuwaani waxaa loo yaqaan **xuquuqaha shaqaalaynta sharciga ah (statutory employment rights)**. Qofka aad u shaqeyso ayaa ku siin kara xuquuqo dheeri ah oo qayb ka ah qandaraaskaaga ama heshiiskaaga. Kuwaani waxaa loo yaqaan **xuquuqaha shaqaalaynta qandaraaska ah (contractual employment rights)** .

## Ma leeyahay xuquuqo shaqo?

Qof kasta oo ka shaqeeya Boqortooyada Midowday wuxuu leeyahay xuquuqo shaqaalayn ah. Kuma xirna meesha aad ka timid ama shaqada aad qabato.

# MAYOR OF LONDON

---

Xuquuqaha qandaraas ee aad leedahay waa in lagu qoraa heshiiskaaga (haddii aad mid leedahay). Tirada xuquuqoaha sharciga ah ee aad haysataa waxay ku xirantahay wax la yiraahdo **xaaladdaada shaqo (employment status)**. Tan waxaa lagu go'aamiyaa nooca heshiiska ama qandaraaska aad la leedahay qofka aad u shaqeyso.

## **Waan ka walwalsanahay inaan lahayn xuquuqo shaqo sababta oo ah xaaladdayda sharciga deganaanshaha**

Xaaladdaada sharci deganaansho waxay saameyn ku yeelan kartaa xuquuqahaada shaqo.

Haddii aad u baahan tahay talo ku saabsan xaaladaada sharci deganaansho, waxaan abuurnay **[khariidad isla-falgal iyo liis macluumaad adeegyada sharci deganaanshaha iyo latalinta.](#)**

Haddii aadan heli karin wax lacag ah oo loogu talagalay dadweynaha (no recourse to public funds, NRPF) oo aad u baahan tahay inaad caawimaad ka hesho taakuleynta dhaqaalaha iyo guryeynta, **Aalada shabakadda NRPF** ayaa kaa caawin doona inaad hubiso taageerada aad ka heli karto dowladda.

Haddii aad tahay muwaadin EU ah aadna u baahan tahay talo ku saabsan joogitaanka UK ka dib Brexit (ka bixiddii UK ee

# MAYOR OF LONDON

---

Midowga Yurub), booqo bogga Duqa magaalada ee **EU Londoners Hub**.

## Waa maxay xaaladdayda shaqo?

Saddexda nooc ee ugu waaweyn ee xaaladda shaqada waa:

1. Shaqaale (Employee)
2. Xoogsade (Worker)
3. Iskiis-u-shaqeyste

Way adkaan kartaa in la ogaado waxa ay tahay xaaladaada shaqo - laakiin aad ayey muhiim u tahay in la ogaado si aad u fahanto xuquuqaha aad leedahay.

Waxaad ogaan kartaa xaaladaada shaqo adoo ka ogaanaya **bogga internet-ka ee Trades Union Congress (TUC)**. Waxaa lagu heli karaa 13 luqadood oo kala duwan.

The **(The Work Rights Centre)** wuxuu leeyahay qalab ka caawinaya inaad ogaato xaaladaada shaqada iyo xuquuqaha aad leedahay.

## Waa maxay xuquuqodeyda?

# MAYOR OF LONDON

---

Waxaan ka soo uruurinay macluumaad fara badan oo faa'iido leh oo ku saabsan xuquuqaha shaqo ee kala duwan oo ay ku jiraan:

- **Laguula dhaqmo si siman** - kala takooridda iyo dhibaataaynta, ilaalinta kuwa macluumaadka sheega (Whistleblowers), xaq u lahaanshaha ku biirista urur shaqaale, addoonsiga casriga ah
- **Xuquuda marka aad weydid shaqada** – lacag bixinta shaqo ka fadhga, ka ilaalinta eryida caddaalad darrada ah, muddooyinka ogeysiinta iyo lacag bixinta, TUPE (Bedelka Ballan-qaadyada (Ilaalinta Shaqaalaynta)).
- **Lacag bixinta iyo lacagta hawlgabka** - ka ugu yar ee Qaranka ama Lacag bixinta Nololaha, jaritaan sharci-darro ah oo laga helo lacag bixinkaaga, liiska lacag bixinta, ee hawlgabka goobta shaqada
- **Xuquuqaha qoysaska iyo waalidiinta** - lacag bixinta fasaxa unumsha iyo, fasaxa aabanimada iyo lacag bixinta, fasaxa wadajirka ah ee waalidka iyo lacag bixinta, fasaxa korsashada iyo lacag bixinta
- **Saacadaha shaqada iyo shuruudaha** -fasaxa nasashada, caafimaadka iyo badbaadada, xuquuqaha aad u leedahay inaad codsato shaqo waqtiyo kala doorasho leh, saacadaha shaqada

# MAYOR OF LONDON

---

- **Fasax ka qaadasho shaqada** fasaxa jirada iyo lacag bixinta, fasax sanadeed ama lacag bixinta fasaxa, fasax loo qaatey xaaladaha degdega ah

## **Sideen ula tacaalaa dhibaataada shaqada?**

Haddii aad dhibaato ku qabtid shaqada waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn karto si aad isugu daydo inaad adiga xalliso. Waxyaabaha aad sameyn karto qaarkood waxay leeyihiin waqti xadidan, sidaa darteed waxaa muhiim ah in si dhakhso leh ficil loogu qabto.

**Citizenship Advice waxay boggooda internet-ka ku hayaan talooyin fiican** kuna saabsan talaabooyinka aad qaadi karto si aad kula tacaali laheyd dhibaatooyinka shaqada.

Mid ka mid ah qaababka ugu wanaagsan ee lagu helo caawinta wax looga qabto dhibaataada shaqada waa in aad ka mid noqoto Iskaashatada Shaqaalaha (Trade Union). Guud ahaan ururada shaqaaluhu ma awoodaan inay kaa caawiyaan dhibaataada dhacday ka hor intaadan ku biirin. **Raadi iskaashatada kugu habboon.**

Haddii aad adigu la la rafaadsan tahay inaad dhibaataada wax ka qabato, waxaa jira meelo badan oo aad ka heli karto caawimaad dheeraad ah.

# MAYOR OF LONDON

---

Ka hor intaadan qofna la xiriirin si uu kuu caawiyo, waxaa muhiim ah inaad haysid macluumaad badan intii suurtagal ah. Way ku caawinaysaa inaad daabacato macluumaadkan, haddii aad awoodid. Waxaad ku sameyn kartaa maktabadda xaafadaada. Waxyaabaha aad u baahnaan karto waxaa ka mid ah:

- tilmaanta dhibaataada ku haysata
- jadwal faahfaahsan oo ku saabsan takoorka iyo dhibaataaynta aad soo martay
- nuqul ka mid ah qandaraaska shaqadaada (haddii aad mid leedahay)
- nuqul ka mid ah warqadaha lacag bixinta ee ugu dambeeyay (haddii aad haysato)
- nuqul ka mid ah waraaqaha ama emaylka u dhexeeya adiga iyo qofka aad u shaqeyso oo la xiriira dhibaataada ku haysata
- tafaasiisha wixii wada hadal ah ee ku saabsan dhibaataada aad kala kulantay qofka aad u shaqeyso

**Xagee baan ka heli karaa talobixin guud oo ku saabsan xuquuqaha shaqada?**

**Ama taleefoon ahaan ama email**

# MAYOR OF LONDON

---

- haddii aad rabto macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqaha shaqada waxaad wici kartaa khadka caawinta Acas **0300 123 1100**. Waxay furan tahay laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 6 fiidnimo, Isniinta ilaa Jimcaha, waxayna kugu caawin kartaa luqad kasta. Haddii aad leedahay cillad maqal ama xagga hadalka ah waxaad adeegsan kartaa Adeegyadooda Qoraalka 'Text Relay' **18001 0300 123 1100**. Waxaa kaloo suurtagal ah in ay kaa caawin karaan inaad xalliso dhibaataada idinka dhexeysa qofka aad u shaqeyso. Tan waxaa loo yaqaan dhexdhexaadin.
- haddii aad naafo tahay oo aad doonayso talo ku saabsan xuquuqahaaga shaqo waxaad kala xiriiri kartaa Adeegga Sharciga Naafada (DLS) **0207 791 9800** ama email [advice@dls.org.uk](mailto:advice@dls.org.uk).
- Working Families waa hay'ad samafal oo qaran oo siisa talobixin bilaash ah waalidiinta iyo daryeelayaasha. Waad booqan kartaa [\*\*bogqooda internet-ka si aad u hesho macluumaad dheeri ah,\*\*](#) u dir emailkooda bilaashka ah ee [\*\*advice@workingfamilies.org.uk\*\*](mailto:advice@workingfamilies.org.uk) (waxay tiigsadaan inay kuugu jawaabaan shan



# MAYOR OF LONDON

---

maalmood gudahood) ama soo wac **0300 012 0312** (hadda waxay furan yihiin Isniinta 3-da galabnimo) - 5 galabnimo, Talaadada iyo Khamiista 12ka duhurnimo - 2 galabnimo)

- haddii aad xubin ka tahay Iskaashatada Shaqaalaha toos ayaad ula xiriiri kartaa si aad talobixin uga hesho
- haddii aad u baahan tahay teleefoon khaas ah ama adeeg taageero email ah oo la xiriira arin gaar ah sida takoorid, waxaad ka heli kartaa bogaga xiriirada hoos ku yaala qeybta ay khusayso arintaas.

## Talobixin fool-ka-fool ah

Waxaan London ka aburnay [khariidado goobaha xarumaha talo siinta ee London](#) ah si aan kaaga caawinno inaad ogaato halka aad ku booqan karto qof si aad uga hesho caawimaad xaga xuquuqaha shaqaalaha waqtiga-dhiman ah. Waxaan sidoo kale [faahfaahintooda ku bixiney liis](#). Qaar badan oo ka mid ah ayaa sidoo kale talo ku bixiya taleefoonka ama emailka, iyo dhowr adeegyo turjubaan ah. Haddii xaruntaada xaafaddu aysan bixin adeegyo turjubaan,

# MAYOR OF LONDON

---

badankood way ku farxi doonaan inaad u soo kaxaysatid saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah oo kuu turjuma.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in meelaha qaar ay awoodi karaan oo kaliya inay ku caawiyaan:

- waxyaabaha qaarkood sida talooyinka guud ama buuxinta foomamka
- haddii aad ku nooshahay ama aad ka shaqayso meel u dhow (tusaale, waxaa laga yaabaa inaad ku nooshahay isla hal degmo)
- haddii aad ka timid wadamada qaarkood ama asal ahaan (tusaale ahaan waxaad ka timid Bariga ama Bartamaha Yurub)
- Haddii dakhligaagu yar yahay ama aad lacag u dhibaataysan tahay
- haddii aad taleefoon u dirtay marka hore si aad ballan u sameysato

Hubso faahfaahinta liiska xarumaheena kahor intaadan booqanin si aad u hesho meesha saxda ah ee kaa caawisa dhibaataada.

# MAYOR OF LONDON

---

## Muxuu Duqa Magaalada sameynayaa si uu London uga dhigo meel fiican oo laga shaqeeyo?

Duqa Magaalada wuxuu markii la doortey, ballan qaaday inuu London ka dhigayo magaalo qurux badan, qeyb weyn oo taas ka mid ahna waxay hubineysaa in qof kasta oo ka shaqeeya London uu qofka ay u shaqeeyaan si wanaagsan ula dhaqmo.

Duqa Magaalada wuxuu ka codsanayaa ganacsatada iyo shirkadaha London in ay iska diiwaangeliyaan **Heerka Wanaagsan ee Shaqo (Good Work Standard)** taasoo ka dhigaysa inay ballan qaadaan inay ula dhaqmi doonaan dadka u shaqeeya si caddaalad ah.

Wuxuu kaloo doonayaa in qof walba oo ka shaqeeya London uu ogaado waxa xuquuqooda shaqo ay tahay si ay u sheegi karaan goorta si xun loola dhaqmayo. Haddii loola dhaqmo si aan caddaalad ahayn, Duqa wuxuu doonayaa inuu dadka u sheego halka ay ka heli karaan caawimaad iyo taageero ay wax uga qabtaan.

## Coronavirus iyo xuquuqaha shaqaynta

Haddii shaqadaada ama dakhligaaga uu saameyn ku yeeshay coronavirus, waxaa muhiim ah in aad ka

# MAYOR OF LONDON

---

warqabto xuquuqahaaga shaqaynta. Haddii ay noqotey in aad fasax ka qaadato shaqada, saacadahaaga la yareeyey ama aad shaqadaada weydey, waxaad xaq u yeelan kartaa xuquuqaha shaqada ama taageero kale oo xilligan kaa sii caawin karta.

Xuquuqaha shaqaynta ee aad leedahay waxay ku xiran tahay xaaladdaada shaqayn. Waa muhiimin in aad marka hore [ogaataa xaaladdaada sheyn](#) si aad u fahamto xuquuqaha aad leedahay.

Macluumaadka dukumiintigan ku qoran waa mid sax laga bilaabo 13-ka Maajo 2020. Fadllan ka fiiri [bogga internet-ka dowladda](#) macluumaadka ugu danbeeya.

## **Haddii aad ka walaacsan tahay in aad nabad ku tahay shaqada**

Dowladda waxay ku talineysaa in aad ku shaqeyso guriga ilaa aysan suurtagal aheyn inaad sidaas sameyso, qofka aad u shaqeyneysana waa in uu sameeyo wax walba oo karaankiisa ah si uu kaaga caawiyo ku shaqeynta guriga.

Haddii aysan suurtagal kuu aheyn in aad guriga ku shaqeyso - tusaale ahaan haddii aad ka shaqeyso dhismaha iyo warshadaha – dowladdu waxay si firfircoon markaas kugu dhiirigelineysaa in aad shaqada aado. Qofka aad u shaqayso waa inuu sameeyo wax kasta oo karaankiisa ah si uu u hubiyo in aad aamin ku tahay shaqada, oo ay ku jiraan tillaabooyin kuu

# MAYOR OF LONDON

---

ogolaanaya inaad ku dhaqanto kala fogaanshaha bulshada. Dowladda waxaa ay abuurtey **tilmaan kuwa loo shaqeeyo** si looga caawiyo in ay badbaadiyaan dadka u shaqeeya ayna ka dhigaan goobtooda shaqo 'meel Covid-19 ka bed-qabta'.

Haddii lagaa codsado in aad shaqada soo gasho oo aad dareensan tahay in aad guriga ka shaqeyn karto, ama aad dareensan tahay inaysan aamin ahayn inaad goobtaada shaqada joogtid, ama aadan shaqeyn karin saacadahaaga caadiga ah adigoo leh mas'uuliyado daryeel awgeed, waxaa muhiim ah in aad la hadasho qofka aad u shaqeyso. Waa in ay dhegeystaan walaacaaga. **Ururka Shaqaalaha (TUC) waxaa uu soo saarey tilmaan ku saabsan waxa aad sameyn karto haddii aad dareensan tahay in goobtaada shaqo aysan aamin ahayn.**

Dadka qaarkood ayaa **dowladdu kula talisey in ay qaataan** tallaabooyin dheeri ah si ay uga fogaadaan in caabuqu ku dhaco. Waxaa tani loo yaqaannaa ka gaashaamashada (shielding) Haddii aad ka gaashaamanayso adigoo raacaya talada dawladda, ama aad u baahan tahay in aad guriga la joogto qof ka gaashaamanaya, qofka aad u shaqeyso waa in uusan ku weydiisan in aad shaqada soo gasho. Badanka xaaladaha oo dhan, qofka aad u shaqeyso weli waa inuu ku siiyaa mushaarka. Eeg tilmaanteena ku saabsan **mushaarka aad xaqa u leedahay haddii aad bukto ama aad ka gaashaamaneyso.**

Waxay noqon kartaa takoorid sharci darro ah haddii qofka aad u shaqeyso si aan macquul ahayn uu isugu dayo inuu kugu cadaadiyo inaad shaqada soo gasho

# MAYOR OF LONDON

---

haddii aad uur leedahay, ama aad ka weyn tahay 70 ama aad leedahay xaalad caafimaad oo loo arko inay tahay naafo sida waafaqsan Sharciga Sinnaanta (Equality Act). **ACAS ayaa halkan ku haysa tilmaan arimahan ku saabsan.**

Mararka qaarkood waxaad u baahan kartaa inaad u sheegto qofka aad u shaqeyso ama qof kale wax ku saabsan wax xun oo ka dhacaya shaqada, tusaale ahaan haddii ay goobtaada shaqada aysan aheyn aamin. Tan waxaa loo yaqaannaa ka war bixin (whistleblowing). Haddii aad tan sameyso, qofka aad u shaqeyso waa inuusan kuula dhaqmin si aan caddaalad ahayn ama uusan ku ceyrin ama ku ruqseyn. **Eeg tilmaanteena ku saabsan badbaadinta kuwa ka war bixiya (whistleblowers).**

Qofka aad u shaqeyso kuguma qasbi karo inaad shaqeyso asagoo ku waxyeeleynaya ama kuu hanjabaya. Haddii aadan rabin inaad u shaqayso iyaga waa inay kuu oggolaadaan inaad ka tagto. Tan waxaa loo yaqaan Adoonsiga Casriga ah (Modern Slavery). Dowladdu waxaa ay bixisey **tilmaan ku saabsan Adoonsiga Casriga ah iyo coronavirus**, oo ay ku jirto talobixin haddii aad tahay qof ka shaqeeya guryaha amaba daryeele ah oo la nool qofka aad u shaqeyso. **Eeg tilmaanteena ku saabsan waxa aad sameyneyso haddii ay kula soo gudboonaato Adoonsiga Casriga ah.**

## Haddii aad u baahan tahay in aad fasax ka qaadato shaqada coronavirus awgeed

Haddii ay kugula [talisey dowladda in aad is-go'doomiso](#) adigoo xanuunsan awgeed, amaba aad u baahan tahay in aad la joogto qof xanuunsan, aadna ku shaqeyn karrin guriga, dowladdu waxay leedahay badanaa waa in lagu siiyo lacagta bukaanka.

Qof walba xaq uma laha lacagta bukaanka. [Hubso in aad xaq u leedahay lacagta bukaanka.](#)

Haddii aadan xaq u laheyn lacagta bukaanka adigoonan mushaar badan hellin awgeed, waxaa suurtagal ah in aad codsan karto [kaalmada dowladda \(benefits\) oo ay ku jirto Universal Credit](#)

Haddii aad ka gaashaamanayso ama aad u baahan tahay in aad guriga la joogto qof ka gaashaamanaya, waxaa kaloo suurtagal ah in aad hesho lacagta bukaanka. Haddii qofka aad u shaqeyso labadiinuba ogolaataan, qofka aad u shaqayso waxaa laga yaabaa inuu awoodo inuu kugu qoro 'furlough' oo ay mushaar kugu siyaan qorshaha Coronavirus ee Job retention Scheme. [Hubi in lagugu dabooli karo the Coronavirus Job Retention Scheme.](#) Waxaad kala hadlli kartaa qofka aad u shaqeyso. Qorshaha Coronavirus Job Retention Scheme wuxuu soconayaa illaa iyo dhammaadka Oktoobar 2020 mana jiri doonto wax isbeddel ah oo ku imaanaya sida ay u shaqeyso

# MAYOR OF LONDON

---

illaa dhammaadka Luulyo. [Ka eeg website-ka dowladda macluumaadka ugu danbeeyey.](#)

Haddii aadan xaq u laheyn lacagta bukaanka adigoo iskiis u shaqeyste ah awgeed, waxaa suurtagal ah in aad xaq u leedahay [kaalmada ah Self-Employed Income Support Scheme](#) Haddii aad u shaqeeyso shirkad laakiin aad hadana ku jirtid xaaladda iskiis u shaqeystenimada, shirkadda aad u shaqeeyso waxaa laga yaabaa inay leedahay qorshe lacagta bukaanka oo u gaar ah. Waxaa jiri kara xaddidaad muddada aad dalban karto lacagta bukaanka ee mashruuca shirkaddaada.

Haddii aad leedahay xaalad socdaal ee aadan wax ka helli karrin khasnadaha dowladda, kama xayirnid helitaanka lacagta bukaanka iyo Qorshaha Dowladda ee Self-Employed Income Support Scheme. Haddii aadan wax xaq ah ku laheyn khasnadaha dowladda waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqda aad leedahay [NRPF Network website.](#)

Haddii aad uur leedahay, waxaa suurtagal ah in aad halis dheeraad ah ku jirto waana inaad guriga uga tagtaa oo keliya sababo muhiim ah. [Soo booqo Maternity Action](#) si aad u hesho talobixin ku saabsan xuquuqahaaga shaqo haddii aad is-go'doominayso marka aad uurka leedahay.

Haddii aad shaqada ka maqan tahay adigoo is-go'doominaya awgeed adigoo raacaya talada dowladda, xaaladaha badankood waxaad heli kartaa 'warqad



# MAYOR OF LONDON

---

cadeyneysa is-godoominta' adigoo ka helaya [NHS 111 online](#). Uma baahnid in aad dhakhtarka aadid.

## **Haddii ay shaqo la'aan kugu dhacdo coronavirus awgeed**

Ganacsiyada qaarkood, oo ay ku jiraan baararka, maqaayadaha iyo dukaamada qaarkood, ayaa loo sheegay inay xiraan si loo joojiyo faafitaanka coronavirus, kuwa kalena dhaqaale ahaan ayey la il darran yihiin. Haddii qofka aad u shaqeyso uusan haynin shaqo kugu filan oo aad qaban kartid, waxaa suurtagal ah in ay ku weydiyaan inaad joojiso imaanshaha shaqada.

Haddii aad adiga iyo qofka aad u shaqeyso labadiinaba oggolaataan, qofka aad u shaqeyso wuxuu awoodi karaa inuu kugu sii hayo mushaarka haddii aysan awoodin inay howlgalaan ama aysan lahayn wax shaqo ah oo aad qabatid coronavirus awgeed. Tan waxaa loo yaqaan 'furlough'. [Hubi in lagugu dabooli karo the Coronavirus Job Retention Scheme](#). Qorshaha Coronavirus Job Retention Scheme wuxuu soconayaa illaa iyo dhammaadka Oktoobar 2020 mana jiri doonto wax isbeddel ah oo ku imaanaya sida ay u shaqeyso illaa dhammaadka Luulyo. [Ka eeg website-ka dowladda macluumaadka ugu danbeeyey](#). [Ururka Shaqaaluhu \(TUC\) waxaa uu hayaa tilmaan](#) ku saabsan xuquuqdaada ku jirta Coronavirus Job Retention Scheme. Waxaa ku dabooli kara Coronavirus Job Retention Scheme haddii aad leedahay nooc qandaraas ah, tusaale ahaan haddii aad tahay shaqaale hay'ad (agency) ama aad ku jirtid qandaraaska loo yaqaanno zero hours contract.

# MAYOR OF LONDON

---

Haddii aad shaqada weysey aysanna ku dabooleyn Coronavirus Job Retention Scheme, [Citizens Advice](#) ayaa haya tilmaan ku saabsan waxa aad sameyn kartid.

Haddii saacadaha aad shaqeyneysey amaba mushaarkaaga hoos loo dhigeey coronavirus awgeed, booqo [Money Advice Service](#).

Haddii aad tahay iskiis u shaqeyste ganacsigana aad weysey coronavirus awgeed, waxaa suurtagal ah in aad xaq u leedahay [kaalmada ah Self-Employed Income Support Scheme](#)

Haddii aad ka welwelsan tahay dakhligaaga aadna si degdeg ah lacag ugu baahan tahay, waxaa suurtagal ah in aad dalbato [kaalmooyin oo ay ku jirto Universal Credit](#). Degmadaadana waxaa suurtagal ah in ay leedahay mashruuc taageero dhaqaale oo ku caawin kara.

Haddii aad leedahay xaalad socdaal ee aadan wax ka helli karrin khasnadaha dowladda, waxaa suurtagal ah in aad u baahan tahay tilmaan inta aadan hellin taageero daryeel. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah [Xaashida xaqiiqooyinka ee NRP Network](#).

## Haddii aad daryeesho caruur ama dad kale

Xiritaanka iskuullada iyo xannaanooyinka darteed, waxaa suurtagal ah in aad u baahan tahay in aad

# MAYOR OF LONDON

---

daryeesho caruur ama qaraabo kale oo aadan awoodin in aad shaqeyso.

Haddii aad shaqaale tahay oo aad caruur leedahay, qofka aad u shaqaysaa waa inuu kuu ogolaadaa inaad hesho wakhti cayiman oo fasax oo mushaar la'aan ah si aad caruurta u daryeesho. Tan waxaa loo yaqaan **fasaxa waalidnimo ee mushaar la'aanta ah.**

Haddii aadan shaqeyn karin adigoo u baahan in aad caruur daryeesho awgeed, waxaa suurtagal ah in aad xaq u leedahay **Coronavirus Job Retention Scheme.** Waxaad kala hadli kartaa qofka aad u shaqeyso.

**Working Families** ayaa haya tilmaan ku saabsan xuquuqdaada fasax qaadashada si aad dad kale u daryeesho.

## Haddii aad talobixin dheeraad ah u baahan tahay

Badanka xarumaha talobixinta ee London hadda ma bixinayaan talobixin fool-ka-fool ah Kuwa qaarkood ayaa talobixin kugu siin kara taleefoonka amaba internetka. **Halkan ayaad ka heli kartaa maabka isla-shaqeeya** ee xarumaha talobixinta London. **Waxaan sidoo kale faahfaahintooda ku bixiney liis.** Eeg bogga internet-ka xarun kasta oo talobixin si aad u hesho tafaasiisha in ay bixin karaan talobixin taleefoonka ah iyo in kale.

# MAYOR OF LONDON

---

Haddii aad u baahan tahay in aad ka hadasho dhibaato shaqada ka jirta, wac [ACAS](#) khadka caawinta oo ah 0300 123 1100.

Waxaa jira ururo takhasus leh oo bixin kara taageero ku habboon dadka London degan oo aan UK ahayn. [United Voices of the World](#), [Work Rights Centre](#), [East European Resource Centre](#) iyo [Latin American Women's Rights Service](#) ayaa bixin kara taageero ay ku bixinayaan taleefoonka luqado kala duwanna ah. Waxaan kaloo haynaa [boq taageero oo loogu talogaley muwaadiniinta aan UK ahey](#) kaas oo ay ku yaallaan talobixin iyo tilmaan dheeraad ah.

Haddii dillaaca COVID-19 uu sababay inaad fasax ka qaadatid shaqada ama uu sababay in dakhligaaga la dhimo, waxay noqon kartaa mid aad u walaac badan. Sidaa darteed, waxaa kula soo gudboonaan kara walwal badan, niyad xumo ama niyad jab. Waxaa jira [macluumaad iyo taageero](#) oo laga heli karo Thrive London oo ku caawin kara.

Haddii dakhligaagu hoos u dhacay muddadii uu COVID-19 dillaacay, waxaa suurtagal ah in aad u baahato in aad buuxiso foom miisaaniyadeed. Hay'adda samafalka ee Money and Mental Health ayaa [sameysey foom](#) kaas oo kuu suurtagelin kara in aad ku dhigto dakhliyada ku soo galaya oo dhan iyo kuwa kaa baxaya si aad si ka wanaagsan u fahamto sida hoos u dhaca dakhliga uu kuu saameyn doono.

Waxaa kaloo ay hayaan [taageero iyo tilmaan](#) ku saabsan caafimaadka maskaxda iyo lacagta mudada lagu jiro musiibada coronavirus.

# MAYOR OF LONDON

---

Haddii aad u bahaan tahay caawinaad dheeraad ah si aad u fahamto waxna uga qabato isbedelka ku yimid dakhligaaga, hay'adda Policy in Practice ayaa haysa [liiska su'aalaha ugu badan ee la is weydiin karo \(FAQs\) iyo qol internetka ah oo lagu sheekeysan karo.](#)

Ururka Shaqaalaha (TUC) waxaa ay hayaan taxane [casharro internet-ka ah \(webinars\)](#) oo daboolaya arrimaha ku saabsan coronavirus iyo shaqada.

## Laguula dhaqmo si siman

Waxaa jira dhowr xuquuqood oo xaqiijinaya in si sinaan ah laguula dhaqmo meesha aad ka shaqeyso.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in qaar ka mid ah xuquuqahan ay quseeyaan keliya dadka leh xaalad shaqo oo gaar ah (sida **shaqaale**, ama **xoogsade**).

## Ula dhaqmidda si siman

### Takoorig iyo dhibaatayn

Qofka aad u shaqeyso kuulama dhaqmi karo si ka duwan dadka kale ayadoo ay sabab u tahay:

# MAYOR OF LONDON

---

- da'daada
- inaad naafo tahay
- inaad tahay transsexual (laba jinsiba galmo la wadaaga)
- inaad xaas tahay ama aad leedahay lammaane madani (si diin ah aan laysku guursan) ah
- inaad uur leedahay ama aad shaqada ka maqan tahay sababta oo ah waxaad dhowaan dhashey ilmo
- Asliyaddaada, oo ay ku jiraan midabkaaga, dhalashadaada ama asalkaaga / asalka aad ka soo jeedo
- diintaada, caqiidadaada ama diin la'aan / aaminaad la'aan
- Jinsigaaga
- qaabkaaga hawlo galmo

Haddii ay saas sameeyaan waxaa suurtagal ah in ay sharciga jabinayaan. Tan waxaa loo yaqaan **takooid (discrimination)**. Sidoo kale kuuma abuurin karaan inaad dareento ciriiri, handadaad, xaqirid ama kuu abuurin jawi cadaawad ah iyada oo ku saleysan

# MAYOR OF LONDON

---

waxyaabaha kore. Tan waxaa loo yaqaan **dhibaatayn (harassment)**.

Tan waxaa ka mid ah **dhibaatayn galmo (sexual harassment)**, kaasoo ah dhaqan kasto oo hab-dhaqan galmo ah oo kaa dhigaya inaad dareento ciriiri, handadaad, xaqirid ama kuu abuuro jawi cadaawad leh.

**Shaqaalaha** iyo **xoogsatada** ayaa sharcigu ka ilaaliyey takoorka iyo dhibaataynta. Sidoo kale sharcigu wuu ku ilaalin karaa haddii aad iskaa u shaqeysato.

**Waxaan u maleynayaa inaan qabo dhibaato la xiriira takoor ama dhibaatayn**

Waxaa jira macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan takoorka iyo dhibaaraynta oo ku yaalla bogga internet-ka **the Equality and Human Rights Commission (EHRC)**.

Waxa kale oo jira aalad hubinta **a Checker tool** oo ah bogga Talobixinta Muwaadiniinta kaas oo kaa caawin kara inaad fahanto in si dadka ka duwan laguula dhaqmo.

**Xuquuqahaada haddii aad shaqeyso waqti-dhiman**

**Shaqo waqti-dhiman ah**

# MAYOR OF LONDON

---

Badanaa qofka aad u shaqeyso kuulama dhaqmi karo si ka duwan dadka kale haddii aad shaqeyso waqti-dhiman: Waa inay ku siiyaan xuquuqo isku mid ah sida qof u shaqeyya waqti buuxa.

Xuquuqaha waqti-dhiman waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo kaliya.

**Waxaan u malaynayaa in si ka duwan dadka layla dhaqmay sababta oo ah waxaan shaqeyaa wakhti-dhiman:**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqaha shaqaalaha waqtiga-dhiman oo aad ka heleyso **Bogga internet-ka ee dowladda.**

**Ka warbixinta waxyaalaha xun ee shaqada ka dhaca**

**Badbaadinta kuwa ka war bixiya (whistleblowers)**

Mararka qaarkood waxaad u baahan kartaa inaad u sheegto qofka aad u shaqeyso ama qof kale wax ku saabsan wax xun oo ka dhacaya shaqada taas oo saameyn karta dad badan ama guud ahaanba dadweynaha. Tan waxaa loo yaqaan **ka war bixin (whistleblowing)**.

Haddii aad tan sameyso, qofka aad u shaqeyso waa



# MAYOR OF LONDON

---

inuusan kuula dhaqmin si aan caddaalad ahayn ama uusan ku ceyrin ama ku ruqseyn.

Xuquuqaha ka war bixin waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo kaliya.

**Waxaan u maleynayaa in si xaqdarro ah layla dhaqmay sababtuna tahay in aan ka war bixiyey**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dhowrista ka war bixinta oo aad ka heleyso **bogga internet-ka ee Protect**. Iyagu waa hay'ad samafal oo siisa taageero qarsoodi ah iyo talo siinta dadka ka war bixiya.

**Ka hortaga rabshadaha, hanjabaadaha ama xakamaynta dhaqanka**

**Addoonsiga Casriga ah**

Qofka aad u shaqeyso kuguma qasbi karo inaad shaqeyso asagoo ku waxyeeleynaya ama kuu hanjabaya. Haddii aadan rabin inaad u shaqayso iyaga waa inay kuu oggolaadaan inaad ka tagto. Hadaysan saas sameyn waxaa suurtagal ah in ay sharciga jabinayaan. Tan waxaa loo yaqaan **Adoonsiga Casriga ah (Modern Slavery)** .

# MAYOR OF LONDON

---

Addoonsiga Casriga ahi waa fal dambiyeed. Tani waxay ka dhigan tahay **in cid walba la ilaaliyey** iyadoo aan loo eegayn xaaladdooda shaqo ama xaaladdooda sharci deganaansho.

## **Sideen ku garan karaa calaamadaha Addoonsiga Casriga?**

Waxaa jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan calaamadaha Addoonsiga Casriga ah oo aad ka heleysid **[bogga internet-ka ee Modern Slavery Helpline](#)** oo ay maamusho hay'ad samafal ah oo aan la arkeyn.

Waxaa kale oo jira macluumaad dheeri ah oo faa'iido leh oo aad ka heleysid **[bogga internet-ka ee Metropolitan Police](#)**.

## **Sideen u tabin karaa Addoonsiga Casriga ah?**

Haddii aad ka walwalsan tahay in adiga ama qof aad taqaanid uu yahay dhibbanaha Addoonsiga Casriga ah, waxaa jira habab badan oo kala duwan oo loo tabin karo:

- waxaad ka wici kartaa Khadka Caawinta Addoonsiga Casriga ah 08000 121 700 si aad talo uga hesho Khasab kuguma aha inaad u sheegto magacaaga. Waxay furan tahay 24 saacadood

# MAYOR OF LONDON

---

maalintii, 365 maalmood sanadkii. Waxaa jira macluumaad dheeraad ah oo aad ka heli karto [\*\*bogga internet-ka ee Modern Slavery Helpline\*\*](#) oo ku saabsan qaabab kale oo aad u heli karto gargaar ama talo:

- waad u tabin kartaa Addoonsiga Casriga ah Metropolitan Police adigoo wacaya 101 ama adoo isticmaalaya **foomkooda internet-ka**.
- haddii ay la xiriirto warshadaha wax soo saarka cusub(freeshka ah), la xiriir [\*\*the Gangmasters and Labour Abuse Authority\*\*](#).
- haddii ay tahay xaalad deg-deg ah ama uu jiro dembi dhacaya wac **999**.
- Adiga oo qarsoodi ah ayaad u soo sheegi kartaa Crimestroppers arimaha Adoonsiga casriga ah adoo ka soo wacaya **0800 555 111**.

## **Ka mid ahaanshaha Iskaashatada Shaqaalaha (Trade Union)**

### **Xaqa xubinnimada Iskaashatada Shaqaalaha**

Qofka aad u shaqeyso kuulama dhaqmi karo si ka duwan dadka kale haddii aad xubin ka tahay Iskaashatada Shaqaalaha ama aad dooneyso in aad

# MAYOR OF LONDON

---

ku biirto. Sidoo kale kuma xirna Iskaashatada aad xubin ka tahay.

Xaqa xubinnimada Iskaashatada shaqaalaha waxaa loogu talagaley **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo keli ah.

## **Waa maxay Iskaashatada Shaqaalaha?**

Iskaashatada Shaqaalahu waa urur ka kooban shaqaale ka dhiga dadka aad u shaqayso inay kuula dhaqmaan si ka fiican sidii hore. Haddii aad xubin ka noqoto Iskaashatada Shaqaalaha ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan haddii aad dhibaato ku qabtid shaqada. Waxaa muhiim ah in la xusuusto inaysan kaa caawin karin dhibaataada aad horey u qabtey, kaliya kuwa cusub oo bilaabma ka dib markaad ku biirtid Iskaashatada Shaqaalaha. Haddii aadan shaqaysan lacag badan waxaa laga yaabaa inaad bixin wax badan si aad ugu biirto Iskaashatada Shaqaalaha.

Waxaa jira macluumaad guud oo ku saabsan Ururada Shaqaalaha adoo ka ogaanaya **[bogqga internet-ka ee Trades Union Congress \(TUC\)](#)**.

Haddii aad xiisaynayso ka mid noqoshada Iskaashatada Shaqaalaha isku day inaad isticmaasho **aaladda internet-ka ee TUC** si aad u raadsato urur.

# MAYOR OF LONDON

---

## **Waxaan u maleynayaa in si ka duwan dadka kale layla dhaqmay sababta oo ahwaxaan xubin ka ahay Iskaashatada Shaqaalaha**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xuquuqaha ka mid ahaanshaha Iskaashatada Shaqaalaha oo aad ka heleyso **[bogga internet-ka ee dowladda.](#)**

## **Xagee ka heli karaa talobixin takhasus leh oo ku saabsan in si cadaalad iyo sinaan ah la iila dhaqmo?**

### **Taleefoon ama email**

- haddii aad rabto inaad hesho caawimaad ama talo ku saabsan takoorida ama dhibaataynta waxaad wici kartaa latalinta sinnaanta iyo adeega taageerada (EASS) taleefanka **0808 800 0082** ama taleefoonka qoraalka **0808 800 0084**.
- haddii aad qaadato lacagta kaalmada ama dakhligaaga hooseeyo oo aad rabto talo ku saabsan midabtakoorka waxaad wici kartaa Latalinta Sharciga ee Bulshada asdigoo ka wacaya **0345 345 4345**.
- haddii aad u maleynaysid in laguula dhaqmay si aan cadaalad aheyn sababtoo ah adiga ama lammaanahaaga aad dhasheen ama korsateen

# MAYOR OF LONDON

---

cunug waxaad wici kartaa Maternity Action **0808 802 0029**.

- haddii aad naafo tahay oo aad doonayso talo ku saabsan xuquuqahaada shaqo waxaad kala xiriiri kartaa Adeegga Sharciga Naafada (DLS) **0207 791 9800** ama email [advice@dls.org.uk](mailto:advice@dls.org.uk).
- haddii aad rabto talo ku saabsan ka badbaadinta ka war bixiyayaasha, waxaad wici kartaa hay'adda samafalka ee Protect oo aad ka wici kartid **020 3117 2520**. Khasab kuguma aha inaad u sheegto magacaaga. Waxaad ka heli kartaa waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan Protect **bogqooda internet-ka** oo ay ku jiraan dariiqooyin kale oo lagula xiriiro.
- haddii aad xubin ka tahay Iskaashatada Shaqaalaha toos ayaad ula xiriiri kartaa si aad talo uga hesho
- Haddii aad dumar tahay oo aad rabto talo la xiriirta sharciga dhibaataayn galmo waxaad kala xiriiri kartaa Xuquuqaha Dumarka ee Dhibaataaynta Galmo goobaha Shaqada (Rights of Women Sexual Harassment at Work) adoo adeegsanaya khadka talo bixinta sharciga ah oo bilaash ah **020 7490 0152**.

## Lacag bixin iyo howlgabnimada

Waxa jira dhowr xuquuqood oo xaqiijinaya in cidda aad u shaqayso ay ku siiyaan lacagta saxda u ah shaqada aad qabaneyso, oo kaa caawin doonta inaad keydiso hawlgabkaaga.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in qaar ka mid ah xuquuqahan ay khuseeyaan oo keliya dadka leh xaalad shaqo oo gaar ah (sida **shaqaale**, ama **xoogsade**).

## Immisa ayay tahay in la i siiyo saacadiiba?

### **Mushaharka ugu Yar ee Qaranka (The National Minimum Wage) iyo Mushaharka Nolasha Qaranka (the National Living Wage)**

Badanaa qofka aad u shaqeyso waa inuu ku siiyaa lacag go'an saacad kasta oo aad shaqeyso.

Intaad heleysid waa kala duwan tahay iyadoo ku xiran da'daada. Haddii aad ka yar tahay 25 waxaa loo yaqaan **Mushaarka Ugu yar ee Qaranka**. Haddii aad ka weyn tahay 25 waxaa loo yaqaan **Mushaarka Nolasha ee Qaranka**.

Lacagtaas waxaa go'aamiya dowladda, waxayna is bedeleysaa Abriil kasta. **Eeg qiimaha ugu dambeeya.**

# MAYOR OF LONDON

---

Mushaarka ugu Yar ee Qaranka iyo Mushaharka  
Nolosha Qaranka waxaa loogu talogaley  
**shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo keliya.

## **Waxay ila tahay inaan helo wax ka yar Mushaaarka Ugu Yar ama Mushaarka Nolosh**

Waxa jira talo fiican iyo aalad waxtar u leh oo laga helo  
**bogga internet-ka My Pay London** si loo hubiyo in lagu  
siinayo lacagta saxda ah. Bogga internet-ka waxaa  
gacanta ku haya Hay'ada Samafalka Legal Action Group

Haddii aad sameyneyso tababar shaqo, inta lagu siinayo  
waxay ku xiran tahay xaaladaada shaqo. Waxaa jira  
macluumaad waxtar leh oo laga helo **bogga internet-ka  
dowladda** oo ku saabsan xuquuqaha aad leedahay  
haddii aad shaqo-barad tahay.

## **Hubinta mushaarkaagu inuu yahay xaddigga saxda ah**

### **Ka-goynta sharci-darrada ah (Unlawful deductions)**

Qofka aad u shaqeyso waxaa kaliya oo loo oggol yahay  
inuu lacagta ka qaado mushaarkaaga waxyaabaha  
qaarkood sida canshuuraha ama kharashaadka aad ku  
oggolaatay markii aad shaqada bilowdey. Xuquuqaha  
qandaraas ee aad leedahay waa in lagu qoraa  
heshiiskaaga (haddii aad mid leedahay).



# MAYOR OF LONDON

---

Haday lacag kaa gooyaan sababo kale awgeed amaba aysanba mushaar ku siinin waxaa suurtagal ah in ay sharciga jabinayaan.

Tan waxaa loo yaqaan **Ka-goynta sharci-darrada ah**.

Xuquuqaha kaa dhowreysa ka-goynta sharci darrada ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha iyo xoogsatada** oo kaliya.

## **Waxaa i haysta mushkiladda ka-goynta sharci-darrada ah**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo ku **yaala bogga interner-ka dawladda** kuna saabsan waxa loo shaqeeyahaagu ka goyn karo ama ka goyn karin mushaharkaaga.

Waxa jira talo fiican iyo aalad waxtar u leh oo laga helo **bogga interner-ka My Pay London** si loo hubiyo in lagu siinayo lacagta saxda ah. Bogga interner-ka waxaa gacanta ku haya Hay'ada Samafalka Legal Action Group

## **Xaq u lahaanshaha macluumaad qoran oo ku saabsan mushaarkaaga**

### **Qoraalka Lacag Bixinta iyo Caddaynta Bixinta Lacagta**

# MAYOR OF LONDON

---

Haddii aad weydiisato, qofka aad u shaqeysaa waa inuu qoraa lacagta intee soo shaqeysay ilaa markii ugu dambeysay ay ku siinayeen.

Sidoo kale waa inay qoraan inta lacag ee ay ka gooyeen mushaarkaaga waxyaabaha sida cashuurta.

Tan waxaa loo yaqaan **Qoraalka Lacag Bixinta ee la kala qaadqaaday (Itemised Payslip) ama Caddaynta Bixinta Lacagta ee la kala qaadqaaday (Itemised Pay Statement)**

Laga bilaabo Abriil 2019, waraaqaha lacag bixinta waa inay sidoo kale ku daraan macluumaadka ku saabsan saacadaha aad shaqaysay halkaas oo lagu siisay lacag ka duwan, tusaale ahaan haddii lagu siiyay wax ka badan oo ay sababtay inaad shaqaysay saacaddo dheeraad ah.

Xaq u lahaanshaha macluumaad qoran oo ku saabsan mushaarkaaga waxaa loogu talogaley **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo keliya.

**Waxaa i haysta mushkiladda Qoraalka Lacag Bixinta la kala qaadqaaday**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo ku saabsan **qoraalka lacag bixinta iyo waxa loo baahan yahay in**

# MAYOR OF LONDON

---

ay ku jiraan oo aad ka heleyso [bogga inernet-ka dowladda.](#)

## **Ka caawinta qarashka howlgabka**

### **Lacagta hawlgabka goobta shaqada**

Qofka aad u shaqayso ayaa ka dhigi kara mushaarkaaga qeyb ka mid ah mar kasta oo lagu siiyo si aad u haysato lacag aad ku noolaato marka aad weynaato oo aad joojiso shaqada. Tan waxaa loo yaqaan **Lacagta howlgabka goobta shaqada (Workplace Pension)** .

Qofka aad u shaqeyso badanaa waa inuu sidoo kale ku soo shubaa xoogaa lacag ah oo dheeraad ah oo howlgabnimadaada mar kasta oo lacag shaqo lagu siiyo.

Caadi ahaan waa inay ku siiyaan Hawlgabka Goobta Shaqada ilaa haddii mooyaane aad u sheegtoidaan aanay ku siin. Tan waxaa loo yaqaan **isqorista otomaatiga ah (automatic enrolment)**.

Lacagta hawlgabka goobta shaqada waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo kaliya.

## **Waxaa i haysta mushkilada lacagta hawlgabka goobta shaqada**

Waxaa jira macluumaad badan oo guud oo waxtarna leh oo aad ka heleyso [\*\*bogga internetka ee dowladda.\*\*](#) kuna saabsan lacagta hawlgabka goobta shaqada.

Haddii aad u maleynaysid inaad dhibaato ku qabtid hawlgabka goobta shaqada waxaa jira talo fiican oo ku jirta bogga internetka [\*\*bogga internet-ka ee Pensions Regulator\*\*](#) oo ku saabsan waxaad sameyn karto iyo cidda aad u baahan tahay inaad u sheegto. **Sidoo kale waxaa ka tabin kartaa [\*\*Qofka aad u shageyso\*\*](#)**

## **Xagee ka heli karaa talobixin takhasus leh oo ku saabsan lacag bixinta iyo lacagta hawlgabka?**

### **Ama taleefoon ama email**

- Su'aalaha guud ee ku saabsan hawlgabka goobta shaqada waxaad ka wici kartaa Khadka Macluumaadka dawladda ee Hawlgabka Goobta Shaqada **0800 731 0372**. Waxay furan tahay 8 subaxnimo ilaa 6 fiidnimo, Isniinta ilaa Jimcaha Haddii aadan maqli karin ama taleefoon aadan kula hadli karin waxaad wici kartaa taleefanka **18001** ka dibna **0800 731 0372** si aad NGT ugu gudbiso fariin-qoraal. Lambarka taleefoonka fariin-qoraalku waa **0800 731 0392**.

# MAYOR OF LONDON

---

- haddii aad dhibaato ku qabto isqorista otomaatiga ah ama aad u baahan tahay talo ku saabsan hawlgabka goobta shaqada waxaad ka wici kartaa Adeegga La-talinta Hawl-gabka **0800 011 3797**. Waxay furan yihiin 9 subaxnimo ilaa 5-galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaa jira macluumaad dheeraad ah oo aad ka heli karto **Boggooda internet-ka** oo ku saabsan qaabab kale oo aad kula xiriiri karto, sida kala sheekaysiga internet-ka (webchat) amaba boostada
- haddii aad rabto macluumaad ama talo ku saabsan in aad qaadaneysa lacagta howlgabka goobta shaqada iyo in kale waxaa jira macluumaad fara badan oo wanaagsan oo ku saabsan kana heli kartid **Bogga internet-ka ee Money Advice Service**. Waxaa ku jira aalad talo bixin iyo xisaabiye

## Waayidda shaqadaada

# MAYOR OF LONDON

---

Waxaa jira dhowr xuquuqood oo kaa difaacaya markii qofka aad u shaqeyso uu ku eryo ama shaqada kaa saaro.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in qaar ka mid ah xuquuqahan ay khuseeyaan oo keliya dadka leh xaalad shaqo oo gaar ah (sida **shaqaale**, ama **xoogsade**).

**In si cadaalad darro ah shaqada lagaaga eryo ama lagugu qasbo inaad shaqadaada ka tagto**

**Ka ilaalin eryid caddaalad darro ah**

Haddii qofka aad u shaqeyso kaa saaro ama uu kaa eryo, waa inay bixiyaan sabab wanaagsan. Hadaysan taas sameyn waxaa suurtagal ah in ay sharciga jabinayaan.

Tan waxaa loo yaqaan **eryid cadaalad darro ah (unfair dismissal)** .

Sidoo kale si xun kuugulama dhaqmi karaan lagugumana khasbi karo inaad ka tagto shaqadaada xili aadan dooneyn.

Tan waxaa loo yaqaan **eryid wax tar leh(constructive dismissal)** waxayna ka mid tahay nooc eryid cadaalad darro ah.

# MAYOR OF LONDON

---

Ka ilaalin eryid caddaalad darro ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** oo kaliya.

## **Waxaan u maleynayaa in si cadaalad daro ah la ii eryey**

Waad hubin kartaa in si cadaalad darro ah shaqada lagaaga eryey adigoo ka eegaya [raacaya tallaabooyinka ku yaalla bogga interner-ka the Citizens Advice](#).

## **Lacag dheeri ah oo aad heli karto haddii shaqada lagaa saaro**

### **Lacag bixinta Shaqo ka saarista ee Sharciga ah**

Mararka qaarkood qofka aad u shaqeyso ayaa laga yaabaa inuu shaqada kaa saaro haddii ay u baahdaan inay yareeyaan tirada dadka iyaga u shaqeeya.

Tan waxaa loo yaqaan **in shaqada lagaa saarey (being made redundant)** .

Haddii taasi kugu dhacdo qofka aad u shaqaysay waxaa laga yaabaa inuu ku siiyo lacag cayiman oo ku saleysan muddada aad u shaqeysay.

# MAYOR OF LONDON

---

Tan waxaa loo yaqaan **Lacagbixinta Shaqo ka saarista ee Sharciga ah (Statutory Redundancy Pay, SRP)**.

Lacagbixinta Shaqo ka Saarista ee Sharciga ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** oo kaliya. Waxay khusaysaa oo keliya haddii aad u shaqaysay loo-shaqeeyahaaga laba sano ama ka badan.

**Waxaan u maleynayaa in ay i haysato mushkiladda Lacag bixinta Shaqo ka Saarista ee Sharciga ah**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo guud oo ku saabsan lacagbixinta shaqo ka saarista ee sharciga ah oo aad ka heleyso **[bogga internet-ka dowladda](#)**.

Haddii shaqada lagaa saaro oo aad rabto inaad ogaato inta xaddiga lacag ah ee ay tahay in aad hesho, waxaad isku dayi kartaa inaad isticmaasho bogga dowladda ee **[aqabka xisaabinta lacag bixinta shaqo ka saarista \(redundancy pay calculator tool\)](#)**.

**Mudo intee le'eg ayaad sii wadan kartaa shaqada ka dib marka lagaa eryo ama shaqada lagaa saaro**

**Muddooyinka Ogeysiiska Sharciga ah iyo Ogeysiiska Sharciyeed oo shaqo ka saaris**



# MAYOR OF LONDON

---

Haddii qofka aad u shaqeyso uu ku eryo ama uu shaqada kaa saaro, waxaa laga yaabaa in ay ku siiyaan waqti go'an ka hor intaadan ka tegin.

Tan waxaa lagu magacaabaa Mudada **Ogeysiiska ee Sharciga ah (Statutory Notice Period)** haddii lagu ceyriyay, ama **Ogeysiiska Shaqo ka saarista Sharciga ah (Statutory Redundancy Notice)** haddii shaqada lagaa saaray.

Mudada ay le'eg tahay ogeysiintu waxay ku xiran tahay mudada aad ku jirtey shaqadaada.

Haddii aad qandaraas leedahay waxa dhici karta inaad ku heshiiseen wakhti ogeysiis ka duwan. Tan waxaa lagu magacaabaa **Mudada Ogeysiiska ee Qandaraaska (Contractual Notice Period)**

Waa laga yaabaa inaad shaqada ka tagto isla markiiba haddii lagaa eryo inaad sameysay wax runtii xun. Tan waxaa loo yaqaan **anshax xumo weyn (gross misconduct)** .

Xuquuqaha mudada ogeysiiska waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** oo kaliya.

**Weli mushaar ma la i siinayaa inta aan ku jiro mudada ogeysiiska?**

# MAYOR OF LONDON

---

Qofka aad u shaqayso waa inuu caadi ahaan sii wadaa inuu ku siinayo mushaharkaaga oo buuxa inta lagu jiro muddada ogeysiintaada.

Mararka qaarkood waxay ku weydiin karaan inaad isla markiiba baxdo laakiin waxay ku siin karaan dhammaan mushaarkii aad kasbatay intii lagu jiray ogeysiiska.

Tan waxaa lagu magacaabaa lacag bixintii halkii ogeysiinta.

## **Waxaan u maleynayaa in ay i haysato mushkilada mudadeyda ogeysiinta ama lacag bixinta**

Waxaa jira macluumaad dheeri ah oo tafatiran oo ku saabsan mudada ogeysiiska iyo mushaarka oo aad ka heleyso [\*\*bogga internet-ka ee Citizens Advice\*\*](#).

Waad hubin kartaa haddii lagu siiyay muddadii ogeysiiska saxda ah iyo lacag bixinta adigoo isticmaalaya [\*\*aaladan ku jirta bogga internet-ka ee MyPay London\*\*](#).

## **Ilaalin hadii shirkada aad u shaqeyso lala wareego**

**TUPE (Bedelka Hawl-qabadka (Ilaalinta Shaqaalaynta)) {TUPE (Transfer of Undertakings (Protection of Employment))}**.

# MAYOR OF LONDON

---

Haddii shirkadda aad u shaqeyso qof/shirkad kale la wareego, waa in sida caadiga ah aad shaqadaada sii haysato adigoo ku joogaya isla shuruudihii iyo heshiisyadiiba. Haddii aadan sidaa aheyn, waxaa suurtagal ah in milkiilayaasha cusub ay sharciga jabinayaan.

Waxaa ku ilaalinaya sharciga la yiraahdo **Bedelka Hawl-qabadka (Ilaalinta Shaqaalaynta)** ama **TUPE** marka la soo gaabiyo

Way adkaan kartaa in la ogaado goorta ay ku ilaaliso TUPE. Tusaale ahaan, milkiilayaasha cusub ee shirkaddaada ayaa laga yaabaa inay kaa saaraan shaqada ama ku eryaan haddii shirkaddu aysan lacag haysan.

Waxa kale oo jira sharciyo kala duwan oo ku saabsan waxa ku dhacaya hawlgabkaaga (haddii aad mid leedahay) taas oo ku xiran nooca shaqada aad qabanayso.

Ilaalinta sharciga TUPE hoostiisa waxaa loogu talagalay shaqaalaha oo kaliya.

**Waxaan u maleynayaa in ay i haysato mushkilada xuquuqodeyda sharciga TUPE hoostiisa**

Waxaa jira macluumaad wanaagsan **bogga ninternet-kamacluumaad ku yaalla Worksmart** oo ku saabsan

# MAYOR OF LONDON

---

xuquqahaagaa marka shirkadda aad u shaqeyso lala wareego:

## Qoysaska iyo waalidiinta

Waxaa jira dhowr xuquuqo oo kaa difaacaya marka adiga iyo lamaanahaaga aad dhashaan, amaba korsataan, cunug

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in qaar ka mid ah xuquuqahan ay khuseeyaan oo keliya dadka leh xaalad shaqo oo gaar ah (sida **shaqaale**, ama **xoogsade**).

## Fasaxa iyo lacag bixin markii aad ilmo dhaleyso

### Fasaxa umusha iyo lacag bixinta umusha

Haddii aad ilmo dhalaysid, qofka aad u shaqaysaa waa inuu kuu oggolaadaa inaad hesho wakhti cayiman oo fasax ah. Tan waxaa loo yaqaan **Fasaxa Umusha Sharciga ah (Statutory Maternity Leave)**.

Waa inay kuu sii wadaan inay ku siiyaan lacag xadidan inta aad shaqada ka maqantahay. Tan waxaa loo yaqaan **Lacag bixinta Umusha Sharciga ah (Statutory Maternity Pay)** ..

Fasaxa Umusha Sharciga ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** oo kaliya.

# MAYOR OF LONDON

---

Mushaaarka Umusha eemSharciga ah ee **dhammaan shaqaalaha** iyo **xoogsatada qaarkood** ee shaqadooda ku sugnaa wakhti cayiman kasbadana lacag xadidan.

Haddii aadan heli karin lacag bixinta umusha, waxaa laga yaabaa inaad heli karto taageero lacageed oo kale oo aad ka hesho dowladda, sida Gunnada Umusha.

Dowladda ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internetka.**

Waxaa kaloo ay hayaan aalad waxtar leh **agab loogu talagalay xisaabinta waxa aad xaga u leedahay.**

## **Fasaxa iyo lacag bixinta markii ay lamaanahaagu ilmo dhaleyso**

### **Fasaxa aabaaha loo umulay iyo lacag bixinta**

Haddii ay lamaanahaagu ilmo dhaleyso, qofka aad u shaqaysaa waa inuu kuu oggolaadaa inaad hesho wakhti cayiman oo fasax ah. Tan waxaa loo yaqaan **Fasaxa Aabaha loo Umulay Sharciga ah (Statutory Paternity Leave).**

Waa inay kuu sii wadaan inay ku siiyaan lacag xadidan inta aad shaqada ka maqantahay. Tan waxaa loo yaqaan **Lacag bixinta Aabaha loo Umulay Umusha Sharciga ah (Statutory Paternity Pay) ..**

# MAYOR OF LONDON

---

Waxa kale oo laga yaabaa inaad awoodid inaad qaadato xoogaa waqti ah oo lacag la'aan ah looguna talogaley baaritaanka caafimaad inta lammaanahaaga ay uurka leedahay.

Fasax Aabaha loo Umulay ee Sharciga ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** oo kaliya.

Lacag bixinta Aabaha loo Umulay ee Sharciga ah ee **dhammaan shaqaalaha** iyo **xoogsatada qaarkood** ee shaqadooda ku sugnaa wakhti cayiman kasbadana lacag xadidan.

Dowladda ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka.**

Waxaa kaloo ay hayaan aalad waxtar leh **oo loogu talagalay xisaabinta waxa aad xaqa u leedahay.**

## **La qeybsiga fasaxa iyo lacag bixinta lamaanahaaga markii aad ilmo haysatid**

**Fasaxa Waalidnimo ee La Wadaago ee Sharciga ah (Shared Parental Leave) iyo Q Lacag bixinta La Wadaago ee Waalidnimo ee Sharciga ah (Shared Parental Pay)**

Haddii adiga iyo lammaanahaaga aad leedihiin ama aad ilmo korsateen waxaa suuragal ah inaad qeybsan

# MAYOR OF LONDON

---

kartaan fasax cayiman. Tan waxaa loo yaqaan **Fasaxa Waalidnimo ee La Wadaago.**

Waa inay kuu sii wadaan inay ku siiyaan lacag xadidan inta aad shaqada ka maqantahay. Tan waxaa loo yaqaan **Fasaxa Waalidnimo ee La Wadaago.**

Fasaxa Waalidnimo ee La Wadaago waxaa loogu talagaley **shaqaalahaoo kaliya** iyo Lacag bixinta Waalidnimo ee La Wadaago waxaa loogu talagaley **shaqaalahaqaarkood iyo xoogsatadaqaarkood oo kaliya.**

Way adkaan kartaa in la xisaabiyo inta ay le'egtahay fasaxa waalidnimo ee la wadaago ama lacagta aad heli karto sababta oo ah waxay ku xiran tahay heerka shaqada ee lammaanahaaga iyo xaddiga lacageed ee labadiinuba aad kasbataan.

Dowladda ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka.**

Waxaa kaloo ay hayaan aalad waxtar leh **oo loogu talagalay xisaabinta waxa aad xaqa u leedahay.**

**Fasaxa iyo lacag bixinta haddii adiga iyo lammaanahaaga aad ilmo korsataan.**



# MAYOR OF LONDON

---

## **Lacag bixinta Sharciga ah ee Ilme Korsashada (Statutory Adoption Pay) iyo Fasaxa Sharciga ah ee Ilme Korsasho Korsashada (Statutory Adoption Leave)**

Haddii adiga iyo lammaanahaaga aad ilmo korsaneysaan waxaa suuragal ah inaad shaqada ka heshaan fasax. Tan waxaa loo yaqaan **Fasaxa Sharciga ah ee Ilme Korsashada** ..

Waa inay kuu sii wadaan inay ku siiyaan mushaar xadidan inta aad shaqada ka maqantahay. Tan waxaa loo yaqaan **Lacag bixinta Sharciga ah Ilme Korsashada**.

Midkiin oo keliya ayaa sheegan kara fasaxa ilme korsashada ama lacag bixinta, laakiin lammaanaha kale ayaa laga yaabaa inuu awoodo inuu dalbado fasaxa aabaha loo umuay ama lacag bixinta.

Waxa kale oo aad awoodi kartaa inaad dalbato fasaxa waalidnimada la wadaago ama lacag bixinta.

Fasaxa Korsashada Ilme ee Sharciga ah waxaa loogu talagalay shaqaalaha oo kaliya.

Mushaaarka Korsashada Ilme ee Sharciga waxaa loogu talagaley **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** ee shaqadooda ku sugnaa wakhti cayiman kasbadana lacag xadidan.

# MAYOR OF LONDON

---

Dowladda ayaa haysa [macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka.](#)

Waxaa kaloo ay hayaan aalad waxtar leh [oo kugu caawineysa in aad sii qorsheyso fasaxaaga korsashada ilme.](#)

**Xagee ka heli karaa talobixin takhasus leh oo ku saabsan xuquuqahayga waalid ahaan?**

- Maternity Action waa hay'ad samafal oo heer qaran ah oo bixinaysa talo bilaash ah oo ku saabsan xuquuqaha umusha iyo aabaha loo umulay xagga shaqada iyo kaalmooyinkaba. Waxaad soo [boogan kartaa boggooda internet-ka si aad macluumaad dheeraad ah u heshid](#) ama soo wac London Maternity Rights Advice khadkooda ah **0808 802 0057**. Waxay furan tahay inta u dhaxaysa 10-ka subaxnimo ilaa 1-da duhurnimo Isniinta, Talaadooyinka, Khamiista iyo Jimcaha.

## Fasaxa shaqada

Waxaa jira dhowr xuquuqood oo macnaheedu yahay in qofka aad u shaqeyso uu ku siiyo waqti cayiman oo fasax ah.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in qaar ka mid ah xuquuqahan ay khuseeyaan oo keliya dadka leh xaalad shaqo oo gaar ah (sida **shaqaale**, ama **xoogsade**).

## Fasaxa iyo lacag bixinta markii aad xanuun dartiis la shaqeyn karin

### Lacag bixinta Xanuunka ee Sharciga ah (Statutory Sick Pay)

Haddii ay tahay inaad shaqada ka maqnaatid maalmo ka badan in yar adigoo xanuunsan awgeed ama jiran tahay, qofka aad u shaqeyso waa inuu ku siiyaa lacag go'an toddobaad kasta.

Tan waxaa loo yaqaan **Lacag bixinta Xanuunka ee Sharciga ah (Statutory Sick Pay)**.

Kaliya waxay lacag ku siinayaan waqti cayiman, laakiin haddii aad qandaraas leedihiin waxaa lagu siin karaalacag badan ama waqti ka badan.

Lacag bixinta Xanuunka ee Sharciga ah waxaa loogu talogaley **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo keliya.

# MAYOR OF LONDON

---

Waxaad [ka ogaan kartaa si aad u aragtid in aad xaq u leedhay lacag bixinta xanuunka](#) websidka Citizens Advice.

**Waxaan u maleynayaa inaan qabo dhibaato la xiriirta lacag bixinta iyo fasaxa xanuunka**

Waad hubin kartaa haddii lagu siiyay xaq lahaanshaha lacag bixinta xanuunka adigoo isticmaalaya [aaladan ku jirta bogga internet-ka ee MyPay London](#).

**Qaadashada fasaxa iyo lacag bixinta fasaxa**

**Fasaxa Sannadlaha ah ama Xaq u lahaanshaha Fasaxa Sharciga ah (Annual Leave or Statutory Leave Entitlement)**

Qofka aad u shaqeysaa waa inuu ku siiyaa maalmo cayiman oo fasax ah sanad walba, waana inay kuu sii wadaan mushaarka sidii caadiga ahayd.

Tan waxaa loo yaqaanaa **Fasaxa Sannadlaha ah** ama **Xaq u lahaanshaha Fasaxa Sharciga ah**(mararka qaarkood la yiraahdo **Xaq u lahaanshaha Fasaxa** ).

Xaq u Lahaanshaha fasaxa Sharciga ah waxaa loogu talogaley **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo keliya.

# MAYOR OF LONDON

---

Dowladda ayaa haysa [macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka](#) oo ku saabsan xaq u lahaanshaha fasaxa iyo mushaarka.

**Waxaan u maleynayaa in ay i haysato mushkilada fasaxa sanadlaha ah ama lacag bixinta fasaxa**

Waad hubin kartaa haddii aad heleysid mushaarka fasaxa adigoo isticmaalaya [aaladan ku jirta bogga internet-ka ee MyPay London](#).

**Waqti intee le'eg ayaad qaadan kartaa markay xaalad degdeg ahi jirto**

**Fasaxa xaaladaha degdegga ah (Time off for emergencies)**

Qofka aad u shaqayso waa inuu ku siiyaa fasax aad ku maareyso xaaladaha deg-degga ah ee ku lug leh dadka kugu tiirsan (sida qoyskaaga ama qof aad daryeesho).

**Tan waxaa loo yaqaan Fasaxa xaaladaha degdegga ah ama fasaxa dadka kugu tiirsan (time off for dependents).**

Qofka aad u shaqeysid waxaa suurtagal ah inay kuu sii wadaan inay ku siiyaan lacag xadidan inta aad shaqada ka maqantahay.

# MAYOR OF LONDON

---

Xuquuqda Fasaxa xaaladaha degdegga ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** oo keliya

Dowladda ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka.** ku saabsan waqtiga fasaxa ee xaaladaha degdegga ah.

## **Fasaxa mushaar la'aanta ah haddii aad caruur leedahay**

### **Fasaxa waalidnimada oo mushaar la'aanta ah (Unpaid parental leave)**

Haddii aad caruur leedahay, qofka aad u shaqaysaa waa inuu kuu oggolaadaa inaad hesho wakhti cayiman oo fasax oo mushaar la'aan ah si aad caruurta u daryeesho.

Waxaad heli kartaa fasax ilmo kasta ilaa ay gaarayaan 18, laakiin waxaa jira xad u go'an inta fasax ee aad qaadan karto sanad kasta.

Fasaxa waalidnimada mushaar la'aanta ah waxaa loogu talagalay shaqaalaha oo kaliya.

# MAYOR OF LONDON

---

Dowladda ayaa haysa macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka oo ku saabsan fasaxa waalidnimada mushaar la'aanta ah.

## Saacadaha shaqada iyo shuruudaha

Waxaa jira dhowr xuquuqood oo xaqiijinaya in aad nabad ku tahay goobta shaqada aadna leedahay isu-dheelitirnaan caafimaad qabta ee shaqada iyo nolosha.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in qaar ka mid ah xuquuqahan ay khuseeyaan oo keliya dadka leh xaalad shaqo oo gaar ah (sida **shaqaale**, ama **xoogsade**).

## Qaadashada nasasho ku filan goobta shaqada

### Hakin nasasho

Qofka aad u shaqaysaa waa inuu kuu oggolaadaa inaad hesho nasasho marka aad ku sugan tahay goobta shaqada.

Sidoo kale waa inay ku siiyaan nasasho kugu filan inta u dhaxaysa maalmaha aad shaqayso iyo inta u dhaxaysa toddobaadyada aad shaqayso.

# MAYOR OF LONDON

---

Waxaa arimaha loo yaqaan **Hakinta nasasho ee goobta shaqada (rest breaks at work)** , **nasasho maalinle ah** and **nasasho todobaadle ah**.

Xuquuqaha la xiriirta joojinta nasashada ah waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo kaliya.

Intaad heleysid waa kala duwan tahay iyadoo ku xiran da'daada.

Dowladda ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka**.

## **Ku sugnaanta Badbaado iyo ku caafimaad-qabka goobaha shaqada**

### **Caafimaadka iyo Badbaado**

Qofka aad u shaqeyso ma aha inuu kugu khasbo inaad sameyso wax kasta oo caafimaadkaaga u xumaan kara. Waa inay sidoo kale la hadlaan adiga iyo dadka kale ee aad la shaqeyso si loo hubiyo in meesha aad ka shaqeyso ay badbaado tahay.

Tan waxaa loo yaqaan **Caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada (health and safety at work)** .

Xuquuqaha la xiriirta caafimaadka iyo nabadda waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo kaliya.



# MAYOR OF LONDON

---

Waxaa suurtagal ah in lagu ilaaliyo haddii aad **iska u shaqeyso** iyadoo ku xiran shaqada aad qabato iyo meesha aad ka shaqeyso.

Hay'adda Fulinta ee Caadimaadka iyo Badbaadada (The Health and Safety Executive, HSE) ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka.**

**Sideen u tabin karaa dhibaatooyinka ka taagan caafimaadka iyo badbaadada?**

Haddii aadan awoodin inaad wax ka qabato dhibaato caafimaad iyo badbaadada naftaada, waad u sheegi kartaa qofka aad u shaqeyso.

Qofka ay tahay inaad u sheegto waxay ku xirantahay nooca shaqada aad qabatid ama meesha aad ka shaqeyso.

Waxaad ka heli kartaa qofka ay tahay in aad u sheegto dhibaataada **bogga internet-ka the Health and Safety Executive.**

**Maxaan sameeyaa haddii shil aan ku galo goobta shaqada?**

# MAYOR OF LONDON

---

Waxaa jira talooyin laga heli karo [bogga internet-ka ee Citizens Advice](#) kuna saabsan waxa aad sameyn kartid haddii aad shil ku gasho goobta shaqada.

## **Ku shaqeynta guriga ama bedelidda saacadahaaga**

### **Xuquuqaha inaad codsato shaqo kala doorashooyin wakhti leh (Right to request flexible working)**

Waxaad weydiin kartaa qofka aad u shaqeyso inuu isbedel ku sameeyo sida aad u shaqeyso, sida inuu kuu oggolaado inaad ka shaqeyso guriga ama beddesho saacadaha aad shaqeyso.

### **Tani waxaa loo yaqaan Xuquuqda inaad codsato shaqo kala doorashooyin wakhti leh.**

Waxay ku qasban yihiin inay bixiyaan sabab wanaagsan oo aan isbeddelada u sameynin.

Xuquuqda inaad codsato shaqo dabacsan waxaa loogu talagaley **shaqaalaha** oo keliya.

Citizens Advice ayaa haysa [macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka](#).ku saabsan shaqada dabacsan iyo sida loo codsado.

## Immisa saacadood ayaa lagaa dhigi karaa inaad shaqeyso

### Tilmaamaha Wakhtiga Shaqada (Working Time Directive)

Qofka aad u shaqeyso ma awoodo inuu kaa dhigo inaad shaqeyso wax ka badan tiro saacado cayiman todobaadkii.

Tani waxaa loo yaqaanaa **tilmaamaha wakhtiga shaqada** ama **xeer-nidaamiyeyaasha waqtiga shaqada (working time regulations)** .

Xeer-nidaamiyeyaasha waqtiga shaqada waxaa loogu talagalay **shaqaalaha** iyo **xoogsatada** oo kaliya.

Shaqooyinka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad shaqeyso saacado badan.

Dowladda ayaa haysa **macluumaad dheeri ah oo aad ka heleysid boggooda internet-ka.**